

## Maxaa laga dhahay ardayda ka midka ah guruubyada khatarta ku jira?

Haddii uu ilmahaagu ka mid yahay guruubyada khatarta ugu jira caabuqa corona (coronaviruset) ama uu ilmahaagu la degan yahay qof ka mid ah guruubyada khatarta ugu jira caabuqa, waa inaad la timaaddaa warqad uu dhakhtar soo qoray oo ka socota dhakhtarka masuulka ka ah bukaanka. Warqadda dhakhtarka waa iney ku xusnaataa in uu ilmahaagu ka mid yahay guruubyada khatarta ugu jira caabuqa ama uu la degan yahay qof ka mid ah guruubyada khatarta ugu jira. Maqnaashaha ilmahaaga waa la oggolyahay haddii aad la imaan karto caddeyn warqadeed oo uu dhakhtar soo qoray.

Haddii aadan la imaan karin warqad uu dhakhtar soo qoray wuxuu maqnaashaha ilmahaagu noqonayaa mid aan sax aheyn haddii uu guriga iska joogo. Sidaas ayey noqoneysaa xattaa haddii aad adiga ka waalid ahaan tiraahdo in ilmahaagu ama qof qoyska ah uu ku jiro guruub khatar ugu jiro caabuqa. Si maqnaashaha ilmahaagu u noqdaa mid sax ah waa inaad la timaaddaa warqad uu dhakhtar soo qoray oo ey ku xusantahay inuu ilmahaagu ka mid yahay guruubyada khatarta ugu jira caabuqa ama uu la degan yahay qof ka mid ah guruubyada khatarta ugu jira.

Arday ka mid ah guruub khatar ugu jira caabuqa isla markaana warqad ka heysta dhakhtar, laakiin sidiisa kale caafimaad qaba, waa inuu ka qeybgalaa waxbarashada inta ey macquulka tahay. Iskuulka ayaa ka shaqeynaya sidii uu ardayga uga qeyb geli lahaa xisooyinka waxbarasho.

Bogga internetka ee degmada waxaa ku jira warbixin uruursan oo ku saabsan caabuqa korona. Warbixinta luqado badan ayey ku qorantahay. Booqo bogga internetka si aad u hesho warbixinta.

<https://www.norrkoping.se/information-om-det-nya-coronaviruset/har-du-barn-i-norrkopings-forskola-skola.html>